



# DIWAANKA DAMMAANADAHA HANTIDA SHAKHSIYEED

Abril 2014

## Ma waxaad iibsaneysaa shey qiimo leh oo horay loo isticmaalay?

Kahor inta aadan iibsan– jeegaree PPSR si aad u aragtid haddii alaabo qiimo leh sida gaari la soo isticmaalay, alaab la siigadayo, qalab, mishiino ama dooni aan deyn lagu lahayn oo uu ka ammaangalay in dib loo ceshado.

## Miyaad uga iibineysaa macaamiishaada shuruudo, sida heysashada lahaanshaha, ama kireynta alaabta qiimaha leh?

Diiwaangleinta xiisahaaga alaabta qiimaha ah ee PPSR ayaa kaa caawin karta in aad dib u soo ceshato haddii macaamiilkaagu uusan lacagta bixin ama noqdo mid musalif ah.

## WAA MAXAY HANTIDA SHAKHSIYEED?

Hantida shakhsiyeedka guud ahaan waxaa ka mid ah dhammaan noocyada hantida oo aysan kujirin dhulka, dhismayaasha iyo alaabta guriga. Tusaalayaasha guud ee hantida gaarka ah waxaa ka mid ah mishiinada, baabuurta, doomaha, abuurka, xoolaha iyo qalabka. Waxaa sidoo kale ka mid ah waxyaalaha aan la taaban karin, sida hantida garaadkaaga aad ku sameysay, hantida lacageed sida saamiyada.

## PPSR

Diiwaanka Damaanadaha Hantida Shakhsiyeed (PPSR) waa diiwaanka interneetka ee qaranka Dawlada Australia ee danaha damaanada badeecada iyo hantida kale ee shakhsiyeed ee ay iibsadayaashu sijoogta ah u gataan, u iibiyaan iyo maalgeliyayaashu..

Iibsadayaashu waxay jeegareyn karaan PPSR si ay u arkaan haddii badeecada la soo isticmaalay ee qiimaha leh ee ay doonayaan inay iibsadaan aan deyn lagu lahayn oo ay ammaan katahay in dib loo la noqo lahaanshaheeda. Tan waxaa ka mid ah badeecada sida mishiinada, qalabka, baabuurta iyo badeecada. Raadintaasi loo jeegareynayo kahor inta aadan iibsan kharashkeedu waa hooseeyaa waana sahlan tahay waana islamarkiiba.

Ganacsiyada shuruudo wax ku iibinaya sida heysashada lahaanshaha ama kireynta badeeco qiimo leh waa in ay ka fekeraan diiwaan dantooda PPSR. Diiwaangelinta rabitaankaaga badeecada ee aysan ganacsigu weli lacagteeda helin waxay ka caawineysaa helitaanka deynta haddii macmiilku uu bixin waayo ama uu noqdo mid musalifay.

Cid kasta waa isticmaali kartaa PPSR. Waxaa laga isticmaali karaa interneetka 24/7 natiijada raadintuna waa islamarkiiba. Lacagta ujrada ahi waa wax yar si aad u sameyso raadin iyo inaad diiwaangliso rabitaanka damaanada badeecadaan ama qaabab kale oo ah hantida shakhsiyeed.

# TANI MA WAX CUSUBAA?

Diiwaanka Dammaanada Hantida shakhsiyeed hadda waa ka keliya ee ah diiwaanka qaran ee dammaanada rabitaanka hantida shakhsiyeed ee Australia.

PPSR waxay bedeshay dhammaan diiwaanada dawlada dhexe, gobolka iyo territory –ga ee dammaanada ammaanka hantida shakhsiyeed, sida Diiwaanka Baabuurta Buuxda ee New South Wales (REV) iyo Diiwaanka ASIC ee Isbedelada Shirkadaha iyo kuwo kasii badan, oo ay ka mid yihiin diiwanada deymaha badeecada iyo qaansheegadka iibka Qiyaastii diiwaangelinta ilaa shan milyan oo gobolka iyo territory – ga ayaa lagu soo wareejiyey diiwaanka cusub ee qaranka markii uu bilowday 30 Janaayo 2012.

## DOONO TALLO XIRFAD AQOONEED LEH

Dammaanadaha hantida shakhsiyeed waxay u saameyn kartaa ganacsigaaga siyaalo kala duwan. Kafeker in aad ka doonato tallo la taliyaha ganacsiga ee xirfada aqooneed leh ee fahmaya ganacsigaaga.

## Sidii aad noola soo xiriiri lahayd

Diiwaanka Dammaanadaha Hantida Shakhsiyeed
Website ka: <a href="http://www.ppsr.gov.au">www.ppsr.gov.au</a>
Iimeyl: <a href="mailto:enquiries@ppsr.gov.au">enquiries@ppsr.gov.au</a>
Taleefanka: 1300007777(130000PPSR)
Saacadaha shaqada(AESTiyoAEDT): <ul style="list-style-type: none"><li>• Isniinta ilaa Jimcaha 8.30 gh ilaa 8 gd</li><li>• Sabtida iyo fasaxyada dadweynaha 9 gh ilaa 2 gd</li></ul> Fadlan jeegaree website kayaga saacadaha shaqada inta lagu jiro xiliga sannadka cusub/ Ciidda Kiristaanka

### Caawimaada luuqadaha kale

Macluumaadka luuqadaha aan Ingiriiska ahayn waxaa laga heli karaa [www.afsa.gov.au](http://www.afsa.gov.au).

Haddii ay dhibkaa heysato kuhadlida ama fahmida Ingiriiska, waxaad ka waci kartaa Adeega Turjumaada Afka iyo Qoraalka (TIS) National 131450 kharashkeeduna yahay kharashka wicitaanka caadiga ah. TIS waxaa la helayaa 24 saac maalintii, toddoba maalmood isbuucii in kabadan 170 luuqadood.